



## PPS oo bixisa ilo iyo taageero loogu talagalay ardayda iyo qoyska LGBTQ

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an tahay abuurista dugsiyo badbaado iyo soo dhaweyn leh oo loogu talagalay gabdhaha ardayda ah ee jecel gabdhaha kale 'lesbian' ama ragga ardayda ah ee jecel ragga kale 'gay', kuwa labbada jinsiba jecel 'bisexual', ardayda bedeshay jinsigooda 'transgender', iyo ardayda leh jinsiga aan caadi ahayn 'queer' leh iyo ardayda wax iswedyiinaysa. Dhawaan, dugsiyada dalka oo idili waxay ka qayb qaateen toddobaadka Ally Week, kaasi oo ardayda LGBTQ ay horseed ka ahaayeen wada hadalada ku saabsan waxa ay uga baahan yihiin isbahaysigooda dugsiga dhexdiisa.

Toddobaadku wuxuu bixiyay xasuuusin awood leh oo ah in qof kasta oo ka tirsan PPS uu leeyahay mas'uuliyyad uu door ciyaaro. Degmadu waxay bixysaa ilo iyo xeerar tiro badan si loo taageero ardaydeena LGBTQ.

"Shaqada abuurista dugsiyo halkaasi oo dhammaan ardayda wax loo xaqijiso, la ixtiraamo isla markaana la qiimeeyo waxay bilaabantaa waqtii hore inta lagu jiro dugsiga hoose waxayna sii socotaa ilaa inta ay ka gaarayaan xirfadaha dugsiga," Brenda Martinek, oo ah Maamulaha Adeegyada Taageerada Ardayda, ayay ku sheegtay farriin ay dirtay shaqaalaha degmada.

Guddiga Waxbarashada PPS ayaa mar labaad ku celisay ballanqaadka degmada ee ku aadan ardayda LGBTQ kaasi oo lagu sheegay dib u eegida lagu sameeyay [Syaasadda aan Takoorka ku Dhisnayn/Ka hortagga Dhibaateynta](#) ee la anxisayay Abriil. Tani waxay daba socotay ansixintii bishii Janaayo ee [Tilmaamaha maamul](#) si loo abuuro jawi badbaado iyo soo dhaweyn leh ooo loogu talagalay ardayda bedeshay jinsigooda 'transgender', iyo ardayda aan ku dhaqmin jinsiga.

Degmadu waxay sidoo kale haysaa ilo la heli karo si macallimiinta looga caawiyo in ay taageeraan ardayda iyo qoysaska LGBTQ:

- [Su'aalaha Inta Badan La Iswedyiyo ee loogu talagalay shaqaalaha ee ku saabsan arrimaha LGBTQ.](#)
- [Tilmaamaha hababka ugu fiican ee loogu talagalay u adeega ardayda LGBTQ](#), waxaa qortay Xarunta Sharciga ee Saboolnimada Koonfurta 'Southern Poverty Law Center'
- Hal [bog oo buuxa oo ka hadlaya ilaha](#) loogu talagalay ardayda, waalidiinta iyo qoysaska, iyo macallimiinta, tababarayaasha iyo kuwo kale.

PPS sidoo kale waxay leedahay Isbahaysiga Dhanka Gay Straight 'Gay Straight Alliances' oo ka jira guud ahaan degmada kuwaasi oo bixin kara koox soo dhaweyn leh, oo wax taageerta oo loogu talagalay in ay ardaydu ku soo biiraan. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan naadiyada GSA, ama haddii Aad hayso su'aalo ku saabsan arrimaha LGBTQ iyo ilaha kale, fadlan booqo Nicole Kappes-Levine [nlevine1@pps.net](mailto:nlevine1@pps.net).